Buug-gacmeedka Asaasiga ah

2023-24

Xaruunta xanaanada caruurta iyo Dugsiga hoose

WAXYAABAHA KU JIRA

MAWDUUCA	BOG
Ujeedada, Hiigsiga iyo Qiimayaasha	3
Iskaashiga iyo Isgaarsiinta	4
Imaanshaha	5
Gaadiidka	7
Amaanka	9
Adeegyada caafimaadka	9
Quraacda iyo Qadada	11
fasaxa	12
Tiknoolojiga	12
Daacadnimada tacliinta	12
Noocyo kala duwan	13
Ogeysiisyada sanadlaha ah ee dadweynaha	14
Foomamka	14

- Foomka iskaa wax uqabso
- Qorshaha safarka

Dugsiga Mounds View
Ujeedada, Hiigsiga iyo Qiimayaasha

Howlgakeena

Dugsiyada Dadweynaha ee Mounds View waxay ardayda ku bari doonaan barnaamijyo badan oo kala duwan kuwaas oo dejinaya rajooyin sare kuna dhiirigeliya guulo aad u wanaagsan.

Himiladeena

Dugsiyada Dadweynaha ee Mounds view waa degmo ka go'an oo diirada saaraya guusha sare ee ardayda iyada oo loo marayo hab dhammaystiran oo isku dhafan qaybaha muhiimka ah ee barashada:

- Jawi waxbarasho oo wanagsan
- Hogaan wadaag iyo isla xisaabtan
- Manhajka asaasiga ah, oo lagu bixiyo isticmaalka tiknoolajiyada waxbaridda/barashada wax ku oolka ah, oo lagu bixiyo hab shaqsiyeed
- Xiriir wanagsan oo ka dhaxeeya qoyska iyo bulshada
- Kormeerka dhaqaalaha iyo maareynta hantida
- Horumarinta joogtada ah

Qiimaheena

1. Waxaan aaminsanahay in natiijooyinka manhajka iyo xeeladaha waxbarashadu ay tahay inay bixiyaan fursado lagu guuleysto barashada iyo guusha sare ee ardayda.
2. Waxaan aaminsanahay inay tahay inaan si joogto ah u qiimeyno oo aan qiimeeyno waxqabadka ardayga iyo waxtarka barnaamijka si loo hubiyo koritaan joogto ah.
3. Waxaan aaminsanahay in jawiga ixtiraamka leh, amaanka leh, iyo dhiirigelinta leh ay kor u qaadayso waxbarasho guul leh.
4. Waxaan aaminsanahay in waalidiinta iyo bulshada ay mudan yihiin in si joogta ah loola xiriiro, loona wada xiriiro iskuulada dadweynaha ee Mound View.
5. Waxaan aaminsanahay in wacyigelinta bulshada oo dhan iyo taagerada dugsiyadeena ay horseedi doonto u doodid xoog leh oo kusaabsan yoolalka waxbarashada.
6. Waxaan aaminsanahay in hogaaminta macalimiinta iyo horumarinta xirfadeed ay muhiim u yihiin hagaajinta joogtada ah ee barnaamijka waxbarida.
7. Waxaan aaminsanahay in wada shaqeeynta waalidiinta, macalimiinta iyo bulshada, go'aan wadaag, iyo hogaaminta wadajirka ah ay muhiim u yihiin hagaajinta dugsiga iyo ardayda si ay u gaaraan heerar sare.
8. Waxaan aaminsanahay in kala duwanaanshaha uu xoojiyo dugsiyada Dadweynaha ee Mounds View, waxaana naga go'an inaan sii xoojino fahamkeena ku saabsan arrimaha dhaqaalaha ee waxqabadka tacliinta iyo helitaanka xeelado cusub oo lagu xiraayo dhamaan farqiga u dhexeeya guulaha.
9. Waxaan aaminsanahay in ardaydu ay mudan yihiin macalimiin tayo sare leh, oo si fiican u tababaran, oo dadaal badan.
10. Waxaan aaminsanahay in dhammaan shaqaalaha ay mas'uul ka yihiin horumarkooda shaqsiyadeed ayna gacan ka geystaan horumarka guud ee Dugsiyada Dadweynaha ee Mounds View.
11. Waxaan aaminsanahay in fursadaha waxbarasho ee shakhsi ahaaneed ay ardayda oo dhan mas’uul ka yihiin waxbarashadooda.
12. Waxaan aaminsanahay in ardayda dareema inay iskuulka la jiraan ama ay isku xiranyihiin ay u badan tahay inay guul ka gaaraan gudaha iyo bananka fasalka.

ISKAASHIGA IYO ISGAARSIINTA

Email

Dhamaan shaqaalaha degmada waxaa lagala xariiri karaa magaca koowad iyo magaca dambe@mvpschools.org.

Wargeyska/Emails

Iskuul kasta wuxuu wargeys udiraa qoysaska bixiyay cinwaankooda emaylka markii ay ardayga ka diiwangelinaayaan internetka. waxaa ku jira macluumaad kala duwan oo ku saabsan waxqabadyada ka socda dugsiga iyo degmada. Waxaa kaloo ku jira helitaanka jadwalka dhacdooyinka dugsiga. Emaylada kale waxaa la soo diraa sanadka oo dhan oo ka yimaada Degmada ama dugsiga oo ku saabsan arrimo kale oo kala duwan.

Faylka isgaarsiinta

Iskuul kasta, arday kasta wuxuu heli doona fayl/qorsheyaal isgaarsiisneed. Fadlan ka fiiri faylka/qorsheeyaha maalinlaha ah ee guriga/ isgaarsiinta iskuulka.

Soo dejiso barnaamijka dugsiga ee Mounds View.

Habka ugu fudud ee aad ku geli karto Iskuulada Mounds View waa talefankaaga casriga ah ama tablet-kaaga. Soo dejiso barnaamijka mobilada ee bilaashka ah ee Degamada, oo diyaar ah helitaanka mobilada, mobilada saaxibtinimada leh ee macluumaadka tusaha. waxaa loo heli karaa qalabka iPhone iyo Android adoo raadinaya Mounds View Schools ee App store.

Bogga intarnetka/ Warbaahinta bulshada

Fadlan booqo bogga degmada ee mvpschools.org. Waxaad ka heleysaa maclumaad badan oo ku saabsan degmada iyo dhismayaasha. Dhisme kasta oo iskuulka wuxuu kaloo leeyahay bog u gaar ah. Waxaad naga heli kartaa Facebook, Instagram, YouTube iyo Twitter. Xasuuso inaad nagu soo raacdo Facebook iyo Twitter, Instagram iyo YouTube.

ParentVue

ParentVue waa bog waalidka/mas'uulka kaasoo qoysaska siiya ammaan, helitaanka elektaroonigga ah ee diiwaanka ardaydooda. Macallimiinta iyo shaqaaluhu waxay u isticmaali doonaan nidaamkan inay qoysaska u siiyaan maclumaad ku saabsan horumarka waxbarasho ee ilmahooda. Ka hel barnaamijka waalidka ee ParentVUE adigoo isticmaalaya barnaamijka dugsiyada dadweynaha ee Mounds View. Booqo App store ama Google Play oo raadi Mounds View Dugsiyada Dadweynaha si aad u soo dejiso aabka. Waxaad ubahaan tahay furaha hawlgelinta ee iskuulada si aad markii ugu horeysay ugasho akoonkaaga (weebka iyo/ ama aapka). Hal akoon ayaa kuu oggolaanaysa inaad hesho macluumaadka dhammaan ardayda iskuulka galaaya ee qoyska.

Kaararka waxbarashadda/ Warbixinnada horumarka

Kaararka warbixinta ee fasalada 1-5 waxaa heli kara qoysaska dhamaadka sannad dugsiyeedka iyada oo loo marayo ParentVue. Haddii aad dooneyso in aad hesho nuqul warbixintan ka mid ah, la xariir xafiiska hore.

Habeenka isgaarsiinta (Shirarka)

Iskuul kasta wuxuu qabanqaabinaaya habeenada wada sheekeysiga waalidka. Taarikhaha iyo waqtiyada waxay ku kala duwanaan doonaan dhismayasha.

La xiriirida macallinka ardaygaaga

Liiska shaqaalaha waxaad ka heleysaa bogga internetka ee iskuulkeena, Waxaa ku jira cinwaanada emaylka iyo lambarada telefoonada. Fadlan ogoow in macallinka laga yaabo in talleefankiisa laga dhigo in uu galo fariimaha codka inta lagu jiro maalinta iskuulka. Fadlan fariin ku dhaaf, macallinka ayaana kula soo xariiri doona 48 saacadood gudahood. Haddii ay jirto **fariin degdeg ah**, la xariir xafiiska iskuulka ee ardaygaaga.

Xiritaanka iskuulka ama Bilowga dambe

Ogeysiisyada ku saabsan xiritaanka dugsiyada ama bilowga dambe ee cimilada xun ama xaaladaha halista ah waxaa lagu gaarsiin doonaa fariinta taleefanka ee Mounds View Messaging, oo ay weheliso emayl iyo farriin qoraal ah. Ogeysiisyada badankood waxay imaan doonan 30 daqiiqo gudahood go'aanka ah in la xiro dugsiyada. Macluumaadka waxaa sidoo kale lagu dhejin doonaa mvpschools.org iyo cusbooneysiinta duubista 651-621-7669 (SNOW). Qoysasku waxay sidoo kale ka heli karaan telefishanka iyo raadiyaha maxalliga ah; si kastaba ha noqotee, wax damaanad ah loma siinayo in warbaahinta ay la wadaagi doonaan macluumaadkayaga ama ay ku gaarsiin doonaan wakhtiga ku habboon. Qoysaska waxaa lagu dhiirigelinayaa in ay macluumaadka xiriirka ee dugsiga ardaygooda ay la socdaan si ay u hubiyaan in ay helaan fariimaha codka iyo emaylka. Qoysasku waa inay mar walba u qaataan in iskuulka furan yahay, haddii aysan maqlin wax kale.

Fariinta telefoonka ee otomaatiga ah

Mararka qaar, Iskuulada Mounds View waxay qoysaska u soo diri doonaan fariimo cod ah. Ogeysiisyadan waxaa ka mid noqon kara wararka ku saabsan xiritaanka iskuulka, xusuusinta ama ogeysiisyada waxtarka leh, iyo ogeysiisyada ku saabsan maqnaanshaha ardayga iyo dheerlitirka koontada qadada. Inta badan fariimaha waxaa loo diraa nambarka taleefanka ee qoysaska oo ay dugsigu diiwaan galiyeen. Wicitaanada xaaladaha degdega ah waxaa loo diraa dhammaan nambarada guriga, shaqada iyo taleefanka gacanta ee qoyska oo la siiyo iskuulka. Waalidiinta / mas'uuliyinta doonaya inay ka baxaan waxay ku sameyn karaan fariin emayl ah webmaster@mvpschools.org oo ay ku jiraan lambarka taleefanka ee ay doonayaan in la xannibo. *Haddii aad dooratid in aadan la xiriirin iskuulka, iskuulku kuuma soo diraayo taleefan ama emayl.*

IMAANSHAHA

Safka Xaadirinta

Wac khadka taleefanka ee iskuulkaga haddii ardaygaagu uu ka maqnaanayo ama uu iskuulka soo kaso daahayo. Kani waa nidaam fariimo cod ah oo la heli karo 24 saacadood maalintii, 7 maalmood usbuucii. Hab kale oo aad ku soo wargelin karto imaanshaha waa adoo isticmaalaya ParentVue.

Joogista guriga marka aad xanuunsan tahay waa mid ka mid ah qaababku ugu wanagsan ee looga hortagi karo faafitanka cudurka. Fadlan ka fiirso buuggan (Ardaygu ma ku filan yahay inuu iskuulka aado?) si ay kuu caawiso inaad go'aan ka gaarto in ardaygaagu u caafimaadkiisa ku filan yahay inuu iskuulko aado. Haddii ardaygaagu uu ku maqanyahay xanuun la og yahay, fadlan fariintaada ku dhaaf macluumaadkaas si aad nooga caawiso dadaalkeena kormeerka.

Fasaxyada la qorsheeyo marku uu iskuulka furan yahay

Dhamaan dugsiyadu waxay hoggansamaan xeerarka degmada ee ku saabsan fasaxa. Maalmaha fasaxa la seegay waa "waa la cafiyay" laakiin waa maqanaansho "aan la oggolayn". Sida maqnaanshaha kale oo dhan, kuwan waxaa loo diiwangeliyaa maqnaansho. Waxaa lagu qori doonaa diiwaanka ardayga. Laakiin ka maqnaanshahaas kuma xisaabsano ka maqnaanshaha iskuulka, mana aha wax saameyn kuleh. Waxaan ognahay in ay jiraan waqtiyo qoysaska qaataan fasax marka ay iskuulka furan yihiin.

Si aad u aragto xeerka, booqo boggayaga internetka ama guji halkan 3109: Xuquuqda iyo waajibaadka ardayga. Haddii aad dooratid in aad ardaygaaga fasax uqaadid, fadlan buuxi foomka Qorsheynta Safarka. Foomkan waxaa loo isticmaalaa in lagu wargeliyo xafiiska iskuulka iyo macalinka ardayga maqnaanshihiisa waxaadna ka heli kartaa bogga ugu dambeeya ee buggan, bogga internetka iskuulka ama xafiiska.

Maqnaanshaha aan raaliga laga aheyn(tusaaloyin)

1. Loga baahan yahay guriga (tusaale, Daryeelka caruurta)
2. Hurda latagtey
3. Baska la seegay

Arimaha imaanshaha dugsiga

Aasaaska aasaasiga ah ee SAM waxa weye:

1. Imaanshaha iskuulka si joogta ah waxay horseedaa guulo waxbarasho oo sareya;
2. Waxbarashadu waa baahida aasaasiga ah ee ardayda oo dhan;
3. Wax barashadu waa furaha guusha mustaqbalka;
4. Imaanshaha iskuulka waa qasab; iyo
5. Waalidiinta/Mas'uulka ardayda aan dhigan dugsiga sida uu sharciga farayo waxaa loo gudbin doona maxkamad si loo caddeeyo dayacaadda wax barasho haddii, in kasta oo dadaallada SAM ee ka hortagga maxkamadda ay socdaan, xaadirku uusan hagaagin.

Dugsiyada hoose waxay u gudbin karaan barnaamijka arday kasta oo ku nool Gobolka Ramsey oo maqnaa saddex maalmood ama in ka badan inta lagu jiro sanad dugsiyeedka iyada oo aan la bixin cudurdaar sharci ah. Dugsiyada waxaa lugu dhiirigelinaya in ay ugudbiyan ardayda sida joogtada ah usoo daahda ama kuwa maqnaanshaha aadka u badan ee xanuunsan.

SAM waa barnaamij kusaabsan kala wareejinta oo ka kooban saddex tallaabo oo ay kujiran wax qabadyo horusocod ah si loo gu qasbo qoysaska inay si wanaagsan wax oga qabtaan dhibaatada imaanshaha. Waalidiinta/ Mas'uuliyiinta ay ardaygoodu saddex maalmod ama ka badan maqnaado waxaa lo gudbin kara SAM. Qoyska ardayga waxaa loo diraa waraqad ku wargelinaysa dhibaatada xaadiritaanka iyo ubaahan in ay kasoo qayb galaan kulan halkaas oo Kaaliyaha Ramsey County Attorney uu kawada hadlaayo cawaaqibka sharci, bulsho iyo shaqsi ahaaned ee sii socoshada xaadiritaanka liita.

Haddii imaanshaha iskuulka uusan hagaagin kadib faragelinta bilowga ah, waalidiinta / mas'uuliyiinta waxa looga bahan yahay inay kasoo qayb galaan dhageysiga kooxda Dib-u eegista Xaadiritaanka dugsiga (SART). Ardayda kaweyn 10 sano ayaa sidoo kale laga yaaba in loga baahdo in ay kasoo qayb galaan dhageysigan. Inta lagu jiro kulanka waxaa waalidiinta lagala xaajonaaya heshiiski waxbarashada. Haddii ay dhacdo in imaanshaha ku guuldareysto inay horumarto kadib dhageysiga SART, codsi dayacaad waxbarasho ayaa laga gudbiyaa maxkamada dhalinyarada ee Ramsey County waxaana la qorsheynaaya dhageysi deg deg ah.

Daahitanka Ardayga

Ardayga waxaa loo arkaa inuu soo daahay haddii soo galo dhismaha kadib marka gambaleelka bilawga laakiin kahor laba saacadood oo subaxnimo ah. Laba saacadood kadib, ardaygu waxaa loo calaamadeynaa nus maalin oo maqnaansho ah. Ardayda waxaa loo arkaa inuu maqnaa nus maalin haddii ay baxaan laba saacadood ama in kabadan ka hor inta aan la gaarin saacadda fasaxa. haddii aradaygu uu waqti hore tago oo uu maalintii ka haran yahay wax ka yar laba saacadood, waxaa lagu calaamadeyn doona daahitan.

Xaaladaha ay ardaydu caadi ahaan kusoo daahan, ama si joogta ah uga baxaan dugsiga, laakiin wax yar laba saacadood ka hor, waxaa lugu xalin doona kiis ba kiis. SAM waxaa loo isticmaali doona sida loogu baahdo.

Shaqada dib uhabeenta

Haddii uu ardaygaaga maqanyahay xanuun awgiis:

- Maqanaansho hal maalin ah, waxaa lasiin doona ardayga shaqa dib uhabeen ah marku soo laabto.
- Maqnaanshaha kabadan labo maalmood:
    - Waxaad la xariiri kartaa macallinka ardaygaaga si aad ucodsatid shaqada dugsiga hadii ay khuseyso.

Haddii uu ardaygaagu uu ku maqan yahay fasaxa awgeed:

- Waxaa lagu talinaaya in fasaxa qoyska uu ku beegmo fasaxa iskuulka. Si kastba ha ahaate, haddii ay tahay inaad safarka qoyska ku qabsataan waqtiga iskuulka raac qorshahan.
    - In la ogeysiiyo macallinka maqnaanshaha soo socda.
    - Buuxi foomka qorsheynta Safarka (Kaasoo ku yaal dhamaadka dukumintigan ama xafiiska dugsiga)
    - Markuu ardaygaaga fasax yahay, dib uhabeen:
        - Waxaa la qoondeyn karaa ka dib marka uu ardaygu soo noqdo. Tirada iyo nooca shaqada dugsiga waxa laga yaaba in wax lagu beddeli karaa si waafaqsan go'aanka macallinka.
        - Waxaa la siin kaliya oo keliya fikradaha horay loo baray, ma ahan shaqada mustaqbalka.
        - Haddii la siiyo, waxaa la filaayaa in la dhameeyo oo la soo celiyo waqti macquul ah ka dib marka uu ardaygu dugsiga kunoqdo.

GAADIIDKA

Gaadiidka (Siyaasada iyo Xeerarka degmada #EF-0103)

Dugsiyyada Dadweynaha ee Mounds View waxay u hoggaansamaan dhammaan sharciyada Minnesota ee khusaya gaadiidka ardayda. Basku waa mudnaan u ah ardayda doorta inay sidaas sameyaan iyado deggan wax kabadan laba meyl dugsiga ama iyagoo bixinaya khidmad gaadiid. Dhammaan ardayda K-12 waxaa la siin doona tababbar ku saabsan badbaadada baska dugsiga. Ardayga waxaa laga filaaya si xushmad leh u dhaqmaan oo aysan wax udhimin amaanka dadka kale ee baska saaran. Dhibaatooyinka habdhaqanka ee baska ku jira waxay keeni karaan cawaaqib laga bilaabo digniin illaa luminta mudnaanta raacitaanka

Gaadiidka Baska

Dhamaan ardayda dhigata xanaanada caruurta waxay xaq u leyihiin in ay raacan baska iskuulka lacag la'aan. Dhamaan ardayda fasalka koowad ila shanaad ee kunool meelo kafog labo meyl oo socod ah waxay xaq u leeyihiin gaadiid bilaash ah o bas ah. Ardayda kunool meel u jirto labo mayl gudahood waa inay bixiyaan $225 ardaygiiba iyadoo qoyska uu bixinaayo $500. Ardayda fasalka kowaad illa shanaad ee degan meel kayar hal meyl dugsiga (agga socodka) uma qalmaan basaska. Haddii lacagta la bixiyo wixii ka dambeeya 1-da Janaayo, lacagta waa $112.50 arday kasta oo qoyskiisu uu ku kooban yahay $275. Lacagta waxaa lugu bixin karaa jeeg, oo lagu buuxin karo " Mounds View Public Schools" oo la geeyo dugsiga ardaygaaga mise internetka "Epaytrak.com" Dhamaan macluumaadka gaadiidka, oo ay kujiraan macluumaadka lacag bixinta onleynka, waxaa laga heli karaa halkan. Haddii aad xaq uleedahay manfacyada waxbarashada, kharashkaas waa lagaa dhaafay. Haddii aad qabtid su'aalo dheerad ah, waxaad kala xariiri kartaa waaxda gaadiidka degmada, 651-621-6027.

Waalidiinta/ Mas'uuliyiinta iyo ardayda waa inay ogaadan in inta badan basaska gaadiidka degmada dugsiga ay layihiin qalabka duubista fiidiyowga. Basaska dugsiyada ee ku qalabeysan qalabka duubista fiidiyowga waxaa ku yaal ogeysiis ku saabsaan yaalidda qalabka duubista fiidiyowga. Ujeedada duubista ayaa ah in la kormeero habdhaqanka ardayda ee basaska, ka caawinta meel marinta xeerarka badbaadada baska dugsiga. Ardaydu waa inay ogaadaan marka ay baska ku safrayan in laduubi karo ficiladooda iyo wada shekeeysiga.

Rajada baska ee ardayda waxa waye:

	Rarista iyo Dejinta	**Markuu baska socdo**
Ixtiraam leh	● Waxaad joogtaa goobta baska shan daqiiqo ka hor ● Si habsami leh u kor ● Raac tilmaaha isla markiiba ● U diyaar garrow inaad kursiga qaybsatid	● Raac tilmaamaha ● Si hoos ulahadal dadka agagaaarkaga joogo ● Wadooyinka fur ● Gacmaha iyo cagaha isku hay ● Isticmaal luuqad ku haboon
Mas'uul	● Gacmaha iyo cagaha isku hay ● Ka caawi nadiifinta baska	● Diyaar u ahaw goobtaada ● Wadooyinka fur
Amaan ah	● Raac tilmaamaha isla markiiba ● Wadada fur	● Fadhiiso ● Cuntada iyo cabitaanka borsada kuhay ● Hore u wajaho

Tusaaloyinka alabta **la ogol yahay** ee baska: Boorsooyinka dhabarka, alaabada muusikada ee yaryar (oo lagu hayn karo dhabta) mashaaricda dugsiga (in lagu hayn karo dhabta).

Tusaalooyinka alabta **aan la ogolayn** ee baska: khatar ah/ waxyaabaha sharci darrada ah/ muqaadaraad, xayiwaanka, qalabka waaweyn, qalabka isboortiga waaweyn.

Sababo la xariira nabadgalyada, marku ardaygu saaran yahay baska, dareewalka baska ma ogolaan doono in ardaygu kagadego baska meel kale marka laga reebo goobta loo qoondayay. Ardayda loma oggola inay bas kale raacaan oo ay iskuulka u aadaan ama uga soo noqdaan.

Galitaanka iyo ka bixitaanka dhismaha iskuulka:

1. Ardaydu waxay sii fadhin donaan baska ilaa laga soo fasaxayo inay galaan dhismaha
2. Ardayda waxaa laga filaaya inay usocdaan dhismaha iyagoo adeegsanaaya lamiiga iyo albaabka loo qoondeeyay ee laga soo galo/ ka baxo.

<u>Ka bixida/ Qaadista</u>
Ardayga Haddii aad keento oo aad ka qaaddo ardaygaaga, fadlan ogsoonow in aan bixinno kormeer ka hor ama ka dib dugsiga. Saacadda ugu horreysa ayaa wacay taas oo u oggolaaneysa ardayda inay galaan dhismaha 15 daqiiqo kahor bilowga maalinta dugsiga.

<u>Ka bixitaanka iskuulka goor hore</u>
Kaliya waalidiinta/ mas'uulka sharciga ah iyo dadka waaweyn ee ku qoran foomka caafimadka iyo xaaladaha degdegga ah ayaa loo ogol yahay inay ardayda ka soo qaadaan dugsiga. Haddii aad dooneyso in qof kale oo aan aheyn qofkii laguu oggolaaday in uu ardaygaada soo qaado.

- U dir qoraal ogolaansho macallinka ardaygaaga
- Haddii ay dhaco xaalad degdeg ah, wac xafiiska.

Isticmaalka Baaskiilka

- Baaskiiladaha waa in ladhigaa oo lagu xiraa melaha baaskiilada ladhigo marka ay yimaadaan agagaarka iskuulka.
- Iskuulka mas'uul kama noqon karo baskiil lumay, la xaday, ama wax yeelo soo gaartay.

AMAANKA

Soo-booqdayaasha

Nidaamka baaritaanka soo-booqdayaasha ayaa ka caawiya raadinta iyo mutadawaciinta dugsi kasta. Marka ay dadka waaweyn u yimaadan inay soo qaatan ardaydooda ama booqdayaasha, waxaa la waydiin doona in ay soo bandhigaan aqoonsi ay dowladdu soo saartay si ay ugalaan nidaamka. Nidaamku wuxuu awood u leyahay in uu keeno digniino ku saabsan dadka halis gelin kara amniga dugsiga. Maamulka dugsiga wuxuu xaq uleeyahay in uu diido gelitaanka dhismaha.

Tijabooyinka Badbaadada

Sannad dugsiyeedka oo dhan, dugsi kastaa wuxuu qabtaa shan tababar oo dabka ah, shan baaritaano oo qufulka/amniga ah, iyo hal tababar oo cimilada adag.

ADEEGYADA CAAFIMAADKA

Macluumaad dheerda ah waxaad ka heleysaa bogga internetka ee "Adeeygyada Caafimaadka" ee degmada ee mvpschools.org/healthservices.

Dugsi kasta oo dadweyne oo Mounds View ah wuxuu leeyahay takhasusle daryeel caafimaad oo Ruqsad u haysata kaas oo ay kormeerto Kalkaakiyaha dugsiga ee katirsan shaqaalaheeda. Waajibaadkooda waxaa kamid ah:

1. In la siiyo daryeel tageera ah ardayda xanuunsanaya ama dhaawacmay inta lagu jiro maalinta dugsiga.
2. In la siiyo daawo ardayda u baahaan inta lagu jiro maalinta iskuulka.
3. Kaalmada ardayda u baahan caawimaad u baahan maareynta cudurada daba dheerada (sida neefta iyo sonkorowga) ee dugsiga.

Waxaa lagugula talinaaya in aad la xariirto kalkaakisada caafimaadka iskuulka, haddii ardaygaagu uu qabo xaalad caafimad oo daba dheeraatay (oo ay jiraan xasaasiyad daran) oo u baahan in la daryeelo inta lagu jiro maalinta iskuulka ama haddii aad ka qabtid caafimadkiisa jirka ama dareenka.

Caafimaadka iyo xaaladaha degdegga ah

Haddii uu ardaygu iskuulka ku xanuunsado oo u baahdo inuu guriga aado, adigu mise qofka loogu talagalay xaaladaha degdegga ah ayaa lagala soo xiriiri doonaa si uu ardaygaaga u soo qaado. Haddii magacyada ama lambarrada telefoonada ee xaaladaha degdegga ah isbeddelo, si degdegga ah xafiiska u soo ogeysii.

Waxaan ku tiirsannahay macluumaadka aad ku buuxiso fomkan. Waxaan ubaahannahay inaan si dhaqso ah kuu helno haddii ardaydaadu xanuunsato ama dhaawacmaan. Haddii aan ku heli karin, waxaan isku dayi doonnaa in aan la xiriirno xiriiryahaaga xaalada degdegga ah ama booliska si ay nooga caawiyaan helitaankaaga. Haddii aad xanunsantahay ama aad dhaawacantahay, wac lambarka 911.

Daawooyinka

Ardayda qaba xaalado caafimaad oo u baahan daawo inta lagu jira maalinta dugsiga, Daawaynta waalidku bixiyo waxaa maamula takhasuska daryeelka caafimaadka ama shaqaalaha kale ee dugsiga iyadoo la raacayo hagida iyo kormeerka kalkaalisada caafimadka ee la aqoonsan yahay. **Majiro sahay daawo ah oo iskuulka leyahay.**

Shuruudaha siyaasada degmada dugsiga waxaa ka mid ah,

Daawada dhakhtarka kuu qoro

- Waa in lagu soo bandhigo weelka daawada laguqoray (farmishaha ayaa soo saari doono nuqul, weel calaamadeysan oo loogu tala galey isticmaalka dugsiga marka waalidka / mas'uulka uu codsodo) iyo macluumaadka soo socdo:
    - Magaca ardayga
    - Taariikhda hadda
    - Magaca daawada iyo xoogeeda
    - Tilmaamaha maamulka
- Oggolaansho qoraal ah oo katimid dhaqtarka daryeelka caafimaadka ee ruqsada haysata iyo waalidka.

Daawooyinka miiska laga soo iibsado

- Waa in lagu keenaa weelka asalka ah oo ay la socoto calaamada soo saaraha
- Oggolaansho qoraal ah iyo tilmaamo ka socota waalidka / mas'uulka

Daawooyinka rijeetada oo mudada gaaban

- Waa inay ku jiraan weelka daawada lagu qoray
- Oggolaansho qoraal uu bixiyo waalidka/mas'uulka

Ardaydu looma oggolo in ay iskood u maamulaan daawooyiinka, marka laga reebo kuwa neefta lagu neefsado iyo cirbadaha epinephrine, haddii ay jirto oggolaansho hore oo laga helo waalidka iyo bixiyaha daryeelka caafimaadka ee ruqsad haysta iyo sidoo kale wareysi lala yeesho kalkaalisada caafimadka ee ruqsad haysta.

Talaalada

Sharciga gobolka Minnesota wuxuu dhigaaya in araday kasta uu haysto diiwaanka dhammaan talaalada loo baahan yahay ama dukumiintiyaada ka dhaafintaanka faylka dugsiga. Shaqaalaha caafimaadka ayaa kula soo xariiri doona haddii dokumiintiga ardayga uusan dhameystirneen. Waalidiinta/mas’uuliyiinta kasoo horjeeda in ilmaahodu la talaalo ama waalidiinta / mas'uuliyiinta ardaygoodu laga fasaxay sababo caafimaad awgood waxay u baahan yihiin inay keenaan dukumiinti ku haboon. Foomka ka dhaafitanka talaalka waxa laga soo dejisan karaa bogga internetka ee degmada qaybta adeega caafimadka ee ama waxaa laga codsan karaa xafiiska caafimadka dugsiga.

Xasaasiyada nafta halis gelisa

Waxaa aannu dugsiyadena kuleenahay arday badan oo leh xasaasiyada nafta halis gelisa. waa muhiim in ardayda haysta xasaasiyada nafta halis gelisa in ay heystan daawooyiin degdeg ah iyo qorsho waxqabbad oo ku saabsan cudurka anaphylaxis oo xafiiska caafimaadka la dhigo. Haddii aad dooneyso inaad qorsheysato guri ku habboon ardaygaada, la xiriir kalkaalisada caafimaadka ee iskuulka.

Baaritaanka Aragtida iyo Maqalka

- *Aragtida- Arraga fog waxaa lagu baari doonaa fasalada xanaanada caruurta 1,3 iyo 5 iyo dhammaan ardayda cusub ee Mound View. Ardayda fasalka kowaad dhammaan waxay yeelan doonaan misaanka muruqyada indhaha iyo baaritaanka aragtida midabka.*
- *Maqalka- Baaritaanka maqalka waxaa loo sameyn doonaa Xanaannada, fasalka kowaad iyo ardayda cusub.*
- Dhammaan ardayda helaya adeegyada waxbarashada gaarka ah waxaa la qiimeyn doona wax maqalkooda iyo aragooda waqtiga qiimeynta bilowga ah iyo saddexda sano ee dib uqiimeynta.
- Arday kasta waa la baari doona haddi uu codsi ka yimaado macalinka ama waalidka
- Kalkaalisada caafimaad ee iskuulka ayaa dib u eegis kusameysa natiijada baaritanada waxayna guriga udirtaa war bixin qoraal ah oo ku saabsan baaritaanka oo kaliya haddii qiimayn caafimad oo dheerad ah loo baahdo.

QURAACDA IYO QADADA

Cuntooyinka quracda iyo qadada ee lagusoo daabacay boggayaga internetka mvpschools.org/lunchmenus. Ardaydu waxay guriga ka soo qaadan karaan qado qabow hadii ay door bidaan. Caanaha waxa lala iibsan karaa qadada qabow.

2023-2043 Qiimaha Quraacda iyo Qadada:
Laga bilaawo sabad dugsiyeedka 2023-2043 dhamaan ardayda waxaa la siyaa hal cunto oo qurac ah iyo hal cunto qadada ah oo bilaash ah maalin dugsiyeed kasta, taas oo ay ugu wacan tahay barnaamijka Cunnada iskuulka ee Bilaashka ah ee Minesotta.

Cuntada Ardayda- Preschool, Kindergarten,
Quraacda: $0.00
Cunnada qadada: $0.00

Cuntada dadka weyn:
Quraacda dadka weyn: $2.25
Qadada dadka weyn: $4.95

Alaabada Ala carte la iibsan karo:
Caano: $0.60 (haddii ardaygaagu keensado qadada guriga oo uu iibsado caano, ama haddii ardaygaaga doonayo kartoon lawaad oo caano in uu la qaato cuntadiisa)

Arday kasta waxaa lasiinaya lambarka PIN-ka marka uu bilaabayo waxbarashada degmada. Tani waxay noqoni doonta lambarkooda ilaa fasalka 12aad. Qoysasku waxay ku arki karaan pin-ka qadada ardaygooda akoonkooda ParentVUE ama akoonkooda Titan.

Waa kuwan siyaabaha aad oogu dari kartid lacag akoonka ardaygaaga:

- Ku bixi kaarka deynta ama kaarka debitka onleynka halkan Titan mvpschools.org/mealcost
- Jeeg u dir dugsiga. loo qoray " ISD 621 Nutrition services". Hubi inaad ku darto magaca ardayga iyo lambarka sirta ah ee PIN-ka.
- Lacag cadaan ah u dir iskuulka baqshad ay ku qoran tahay magaca ardayga iyo lambarka sirta ah ee PIN-ka.

Haddii baaqiga ardaygaaga ka hoos dhaco $0.00, qaybta adeega Nutrion waxay soo diri doonaan emayl in waalidka / Mas'uulka la xasuusiyo si ay akoonka usoo buuxiyaan.

Manfacyada waxbarashada:
Qoysasku waxay ka buuxin karaan foomka codsiga fa'iidooyinka waxbarashada 2023-24 khadka tooska ah ee mvpschools.org/reducedfees laga bilaabo Agoosto 1. Codsiyada waraaqaha ah waxaa sidoo kale karaa dhammaan iskuulada iyagoo ku qoran luuqada Ingiriiska iyo Spanishka. Codsigan waa in la buuxiyo sanad walbo. kala xiriir Adeeygyada Nutrition 651-621-6025 ama nutritionservices@mvpschools.org

Dareenka cuntada/ Xasaasiyada cuntada
Haddii uu ardaygaaga leyahay xasaasiyad cunto ama dareen, fadlan la xariir kalkaalisada caafimaadka ee iskuulka si aad ugu sameyso qorsho ilmahaaga. Cuntooyinkeena quraacda iyo qadada waxaa kujiro digir iyo geedo yaryar. Macluumaad dheeraad ah waxaad ka heleysaa mvpschools.org/specialdiet

FASAXA

Dhamaan ardayda waxaa la siin doona qiyaas 20 daqiiqo maalin kasta si ay unastaan. fadlan hubi in ardaygaagu uu ku lebisan yahay dhar ku haboon cimilada. waxaan heli doonaa nasasho gudaha ah hadii uu jiro roob, hilaac ama haddii uu heerkuulka gaaro 0 darajo iyo/ ama qabowga dabeeshu gaadho 10 digrii ka hooseeysa eber. Go'aanada sameynaya fasaxa waxay ku salaysan doonaan xaaladaha maxaaliga ah waqtiga fasaxa iyo sida xusan weather.gov. Ma awoodno inaan qaabilno codsiyada ardayga ee in uu gudaha kusii jiro fasaxa, ilaa uu ka helo warqada dhakhtarka xafiiska caafimaadka.

TEKNOLOJIYADA

Isticmaalka internetka
Degmo Dugsiyeedka Mounds View waxa ay ku rakibtay shaandhaynta barnaamijka internetka kaas oo buuxin doono shuruudaha gaarka ah ee dugsiyada K-12 ee ay meel mariyeen Gudigga Isgaarsiinta Federaalka. Qalabkaan wax lagu baaro wuxuu sameeya in kombyuutar walbo oo kuyaal dhisma kasta oo kuyaal degmadayada wuxuuna la socda dhamaan taraafikada internetka. waxay shaandhayn doonta bogagga la rabo iyadoo la marayo kaykeeda macluumaadka ee goobaha la qiimeeyay.

Qoysasku waxay dib u eegi karaan macluumaadka qarsoodiga ah iyo shuruudaha adeega ee codsiyadda waxbarasho ee loo adeegsado degmaha iyagoo booqanaaya bogga dadweynaha ee Mounds View ee https://moundsviewschools.app.learnplatform.com/new/public.

Telefoonada gacanta/ Saacadaha casriga ah/ Qalabka gacanta
Waa filashada dugsiga in taleefanada gacanta ay ku sii jiraan boorsada dhabarka ee ardayga maalinta oo dhan, xitta inta ay ku jiran baska. Haddii ardaygaagu keeno qalab oo uu noqdo mid mashquuliyo waxbarashadiisa ama waxbarashada dadka kale, ama uu saameyn ku yeesho ammanka ardayga, waalidka / mas'uulka ayaa la ogeysiinayaa iyo qalabka waxaa lugu hayn doona xafiiska guud illaa dhamaadka maalinta. Qalabka ma ahan in loo isticmaalo hab isgaarsineed inta lagu jiro maalinta dugsiga. sida wax kasta oo qiimo leh, dugsiga mas'uul kama aha xatooyada ama waxyeelada.

DAACADNIMADA TACLIINTA

Shaqooyinka iyo qiimeynta ardayda waxaa loo sameeya si loo cabbiro fikradaha iyo heerarka fasalka. Sida daraaded, waxaa lagama maarman ah in arday kasta si daacad ah oo cadaalad ah uu dhammaan u dhamaystiro shaqooyinka iyo qiimeynta. Haddii ardaydu ku dhaqaaqaan ujeedo leh, dhaqan aan daacaad ahayn tacliin ahaan (tusaale, xatooyo), waalidiinta / mas'uuliyiinta waa la ogeysiin doonaa.

WAX YAALO ISKU DHAFAN

Cuntooyinka Dhalashada

Si loo helo jawi badbaado leh, ardeydeena xasaasiyada cuntada leh, dhammaan dugsiyada hoose waxey leeyihiin tilmaamaha soo socda ee xafladaha dhalashada:

> Haddii aad rabto inaad wax la wadaagto ardayda aad isku fasalka dhigataan dabaal dega dhalashada, fadlan ku koob qirasho aan cunto ahayn. Fadlan ha soo dirin buufinnada cinjirka ah. Tusaaloyinka deeqda waxaa ka mid ah, laakin aan ku xaddidnayn, kuwa soo socda: buuga ardayga ee ugu jecel yahay ururinta fasalka, istiikarada, qalin qoriga, qalinka, calameeyaha, tirtiraha, ciyaarta gudiga ee fasalka maalmaha nasashada gudaha, iwm.

Dharka ardayga

Ardayda xiran dharka carqaladeeya waxbarashada waxaa loo diri karaa xafiiska caafimaadka oo waxa la siin karaa dhar kale oo ku meel gaar ah. tusaale ahaan, dharka leh- hal kudhigyo ama jilayaal muujinaaya khamriga, doroogada, tubaakada, galmada, rabshadaha, aflagaadada, hadalada cayda ah ama tilmaamaha lama oggola.

Luntay oo la Helay

Wax yaabaha lumay waxaa lagusoo bandhigaa meelo la aqoonsaday oo kuyaal dugsiga. Alaabada aan la soo qaadan waxaa la siin donaa si xilliyeed sanadka oo dhan. Xasuusinta waxey kujiri doontaa wargeyska dugsiga. Alaabada yaryar ama qiimaha badan, sida faraantiga, saacadaha iyo furayaasha waxaa lagu heyn doona xafiiska iskuulka. sida aad uyareyso tirada wax yaabaha la waayey iyo kuwa la helay, fadlan calaamadee dharka ardaygaaga.

Ururka waalidiinta iyo macallimiinta (PTA) ama Ururka Macallimiinta iyo waalidka.

PTA/PTO waa urur waalidiinta, shaqaalaha iyo shakhsiyaadka xiiseynaya bulshada waxbarashada dugsiga. Ujeedada waxbarashada waa in lagu dhiirigeliyo iskaashiga iyo xiriirka ka dhexeeya guriga iyo iskuulka.

Xayawaanka guriga lagu xanaaneyo

Badbaadada iyo ammniga awgiis, xayawaanka qoyska looma oggola iskuulka waqti walbo.

Iskaa wax uqabso

Haddi aad xiiseyneso in aad iskaa wax uqabso ka sameeso iskuulka ardaygaaga, fadlan la xariir xafiiska iskuulka. Dhammaan mutadawiciinta ka tirsan dugsiyada Mounds View waxaa laga rabaa inay dhamaystiran baaritaanka asalka ah ee lagu sameeyo dugsiga ardaygaaga. Tabarucayaasha waxaa laga rabaa inay baartaan Xeeraha EG-3104 ka hor intaysan bilaabin shaqada dugsiga.

OGAYSIIS SANADEEDKA DADWEYNAHA

Xiriirinta ogeysiisyada sanadlaha ah ee dadweynaha: Xidhiidhka qarsoodiga ah

Xiriirinta Ogeysiisyada dadweynaha ee sanadlaha ah ee dheeraadka ah.

FOOMAMKA

FOOMAMKA ISKA WAX UQABSO

Haddii aad dooneyso in aad iskaa wax uqabsato, fadlan buuxi kuwan soo socda:

1. Aqri, Xeerarka ku saabsan Dhibaataynta, rabshadaha iyo caadeysiga (EG-3104)
2. Daabac oo buuxi kuwan soo socda:
    a. Foomka baaritaanka asalka ah ee mutadawiciinta.
    b. Tilmaamaha iskaa wax uqabsashada iyo Foomka codsiga
3. Nuqulada la daabacay ayaa yaalla xafiiska weyn ee iskuul kasta. Foomka buuxa usoo celi xafiiska iskuulka.

FOOMKA QORSHAHA SAFARKA

Haddii ardaygaagu ka maqnaan doono iskuulka safarka awgiis, fadlan buuxi foomka hoose kuna gudbi xafiiska iskuulka. Foomka Qorsheynta Safarka